
# Warbixin ku socoto qofka uurka leh- oo ku sabsan bilowga foosha

In la bilaabo foosha badanaa waxa lagula taliyaa qofka qabo xanuun ama dhibaatooyin uurka awgood. In foosha la bilaawo waxaa la sameeya oo keliya iyaado loo tixgelinayo daaweynta ugu fiican ee hooyada / ama ilmaha. Bilaabidda dhalashada waxay noqon karta mid dhib badan oo waqti badan qaadato, sidaa darteed waa inay jirtaa sabab wanaagsan oo aan ku dooran karno arrintan. Ilayn waxaa la isku dayeynaa inaan dhalashada bilowno inta uusan jirka laftiirkisa diyaar u ahayn. Sababtaas awgeed, bilowgu dhalmada waxay qaadan karta dhowr maalmood dumarka qaarkood, halka kuwa kale ay qaadato dhowr saacadood oo keliya. Wa inaad heshaa macluumad wanaagsan si aad u sameyso go'an ama xulasho wargelin leh.

Marka dhalashada la bilaabayo, haddi dheecaanka ama biyaha cunugga dilaaceen ama inaa hore u umushayba waa arrimo saameeya inta ay qadanayso bilowga fooshaada. Ma garan karno sida jidhkaagu uga jawaabayo habka bilowga ah ee la adeegsaday illaa ay aan isku deyno. Ka hor intaanan bilaabin foosha, waxaan sameyna doonna qorshe ku saabsan sida bilowgu u dhici doono.

Qaabku bilowga wuxuu ku xiranyahay sida qaangaarka ilma galeenku u yahay. Dhaktarka wuxuu had iyo jeer sameyn doonaa baaritaanka xubinta taranka dumarka si loo qiimeeyo qaan-gaarnimada (bishops score lo yaqaano), waxaa la fiirinaya dhererka afka ilmo-galeenka, sida uu u jilicsan yahay, haddii uu bilaabay inuu furmo iyo meesha miskaha ee ilmuhu ku yaalliin. Ka dib dhaktarka ayaa go'aansanaya qaabka bilowga foosha.




*Jaantus 1aad baaritaanka xubinta taranka haweenka*




*Jaantus 2aad afka ilmagaleenka/ aan qaan gaarin*




*Jaantus 3aad afka ilmagaleenka/oo qaan gaaray*

Haweenka dhalashada lo bilaabay waa inay ku umulaan qeybta dhalmada oo isbitaalka kuma umuli karaan biyo sida haweenka qaarkood.
**Haddi aay timaado dhibaatooyin xagga awoodda shaqalaha, marar dhif ayaan dib u dhigi doonnaa bilowga foosha maalmo yar.**

Haweenka qaarkood ayaa aad ugu daalaan inta lagu jiro hawsha bilowga. Hurdo yar, foosha xanuunkeeda iyo waqtiga badan ayaa dadka badankood ku noqato dhib badan. Sidaas darteed waxaa lagugula talinayaa inaad nasato / seexato markii aad karto, xiita maalinta. Waa muhiim inaad hesho nafaqo fudud iyo cabitaan badan si aad u hesho tamar iyo awood.

Dhalmada waa shaqo adag, laakiin sidoo kale waa inay noqotaa khibrad wanaagsan. Waa inaad heshaa hagitaan wanaagsan intaad hawsha ku jirto.

***Gelista kateerka buufinta ah.***

Kateetarka buufinku waa tuubbo caag ah oo khafiif ah oo badana loo isticmaalo in lagu faaruqiyo kaadi heysta oo wixi kaadi ku jiro laga soo saaro. Kateetarka ayaa la geliyaa ilma galeenka iyadoo la marinayo xubinta taranka haweenka, oo la si marinayo minka afkiisa oo la dhaafayo afka ilma galeenka hoose. Waa inuu u dhexeeyaa madaxa ilmaha iyo minka afkiisa. Marka kateetarka la dhigo bartiisa, buufinka waxaa ku jiro biyo cusbo leh oo loogu talagalay nadiifin.



Illustrasjon: Eline Skirnisdottir Vik

*Jaantus 4aad kateetar buufin*

Qayb ka mid ah tuubbada caagga ah ayaa ka soo bixi doonta xubinta tarankaaga, taas oo lagu xirayo bowdadaada ama cajirka. Mana ka hor tegayso wax qabadka caadiga ah sida dhaqdhaqaaqa iyo booqashooyinka musqusha. Waa wax caadi inaay ka yimaadan dheecaan iyo xooga dhiig cusub oo ka yimaada xubinta taranka markii tuubbada la geliyo ka dib.

Wax yar ka dib markii la geliyo kateetarka, waxaad la kulmi kartaa xooga fool iyo xanuun ilmo-galeenka. Waa xanuun mar ku qabanayo marna ku deynaayo oo kala xoog badan. Waxayna noqon karaan kuwoo xanuun badan. Waxay socon karaan dhowr saacadood. Dadka qaarkood, xanuunkan waxay kicin doonaan xanuunka foosha iyo dhalmada dhabta ah.

Haddi aad ku safri karto gurigaada adiga oo haysta kateetarka buufinta waxay ku xirantahay sabata aad foosha ki bilaabtay iyo masaafada aad u jirto isbitaalka, iwm.

***Bilowga foosha iyaado la isticmaalayo prostaglandin***

Prostaglandin waa hormoon la sameeyay, waxaa la heli karaa iyaado kaabsal ah ama jeel la marinayo xubita taranka haweenka. Waxaad lagu siinaya dawadaan afartii ama lixdii saacadoodba mar. Isbitaalka ayaa ku sheegayo sida daawada lo isticmaalayo. Wareeg kasto oo daawada lagu siinayo waxa la hubinaya dhadhaqaaqa wadanaha ilmaha (diiwangelinta CTG) waxa kale lala soconaya foosha oo si kordhayso. Afartii ama lixdii saacadoddba mar, dhaktar ama umuliso ayaa sameyn doona baaritaan sida loo qiimeyo bishop score. Immisa kaabsol ama jeel ayaa loo baahan yahay si loo gaaro ilmo galeen qaangaar ah, waxaay ku xiratay qofka, qofba wa si.
Umulisada/dhaktarka ayaa si joogto ah u qiimeyn doona saameynta daaweynta iyo xaaladda adiga iyo cunugaada. Iyaado ku saleysan haddi aad u bahan tahay qorshayn daweyn dheeraad ah, dabagal iyo tallabooyin. Waa wax caadi ah in foosha oo gaaban oo so noqnoqda ka qabaato ilmo galeenka iyo xanuun u eg caadada saacadaha ugu horeyaa inaad dareento. Waxyaabaha noocan ah waxay isku rogi karaan foosha saxda ah iyo dhalashada.

Haddi aadan ku guuleysan bilaabista foosha dhowr maalmood gudahood, adoo kaashanaya buufin iyo prostaglandin, bilaawidda foosha waxa lagu si wadi doona in la dalooliyo xuubka ama lagu siiyo faleebo kiciya foosha. Halkan, xaaladaha dhifka ah, waxay noqon kartaa is bedel oo ah in dib loo dhigo bilaabida dhowr maalmood. Si loo siiyo afka ilmo galeenka waqti uu ku sii weynaado, laakin xalka noocan oo kale ayaa lagu si sheegaya intaadan imaan ka hor (‘’isku dayga bilowga foosha’’).

***Ku-shuubista amniotomy / dareeraha kiciya foosha***

Haddi afka ilma galeenka qaan gaar yahay, laakin dhalmada aysan si sax u bilaaban, umulisada ama dhaktarku waxay duri karaan xuubka ilma galeenka ku hareersan, iyaado la isticmaalayo ul caag khaafiif ah si dheecaanka ama biyaaha foosha u imaadan, dad badan ayaa arrintan sababto inay fooshooda si xog badnaato. Arrintan waxa u dareemaysa sida baaritaanka caadiga ah oo joogtada ah ee xubinta taranka dumarka wax xanuun ah ilmaha ma dareemayo. Ka hor iyo ka dib arrintan markki la sameeyo ayaa la diiwaangelin doona dhadhaqaaqa wadna ilmaha.

Marar badan ayaay dhacda in faleebada kicista foosha lagama maarmaan noqoto. Jidhka ayaa markaa la siiyaa hormoonka oxytocin, kaas oo sababa in ilo galeenka isku soo ururo oo uu dhalo. Marka dhalashada ay ku bilaabato faleebo, garaaca wadnaha ilmaha iyo fooshaada si dhow loola socdaa. Sidaa darted waxaad ku xirantahay aaladda CTG oo diiwaan gelisa garaaca wadnaha, dhaqdhaqaaqa wadnahaaga iyo wadnaahaga ilmaha. CTG (cardiotocography) waa kormeer elektaroonik ah oo ku saabsan garaaca wadnaha ilmaha dhaqdhaqaaqa iyo foosha hooyadaba.




*Figur 4 Amniotomi -Å ta vannet*
*Ill: 2-5 Eline Skirnisdottir Vik*

## Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, naweydii oo keliya, annagaa halkaa adaan u joogna. Soo dhowow!